IF METALL



# Ku soo dhawow

IF Metall

SOMALISKA

# Waa wax xiiso badan in aad adigu gaar ahaan xubin ka noqotay IF Metall!

Keligaa maahid. Si wada-jir ah waxaynu nahay in ka badan 300 000 xubnood oo jooga ku dhawaad 13 000 goobood oo shaqo kuna yaala Iswiidhan oo dhan. Waxaan tusaale ahaan ka shaqeynaa garaashyada-iyo wershadaha balaastiigga, wershadaha dawada, wershadaha dharka, wershadaha birta, labadaanyooyinka, wershadaha dhanka, warshadaha alaabta dhismada, goobaha macdanta laga qodo, geerashyada baabuurta iyo dhanka Samhall. Waxaad ka shaqeynsaa in ay Iswiidhan shaqeyso. Waxaan hubineynaa in ay noloshaada shaqadu shaqeyso!

Ururkeenna shaqaaluhu wuxuu ka shaqeeyaa in adiga iyo dhamaan xubnaha kale la idiinla dhaqmo si cadaalad ah una heshaan mushaarro fiic-fiican, deegaan shaqo oo fiican isla markaana aad saameyn ku yeelataan ammaanka shaqadiinna. Waxaan nahay urur shaqaale oo dumarka u hiilliya, cidna aan dibadda dhigeynin oo u halgamaya bulsho siman oo dimuquraaddi ah. Waxaan shaqadeenna ku saleynaa mabd'a isku qiimo ahaanshada dadka - iyadoo aan taas loo eegeyn da'da, jinsiga, asalka ama dabciga galmada.

Qormadan waxaad ka akhrisan kartaa wax dheeraad ah oo ku aaddan shaqadeenna wada jirka ah iyo sida aad uga qeyb qaadan kartid, una saameyn kartid. In xubin la noqdo waxaa ku jira faa'iidooyin fara badan. Mar kasta oo aynu sii badanno waxaa sii kordhaysa saameynta aynu yeelan karno. Waxaa intaas dheer in ay ku jiraan ceymisyo fiicfiican oo fara badan, waxbarashooyin iyo faa'iidooyin kale. Hubi in aad ka faa'iideysatid!

Waan kuugu hambalyeyneynaa doorashada aadka u fiican, soo dhawow ayaannuna ku leennahay!

# Urur shaqaaluhu wuu kuu dhawyahay

Ka xubin ahaan waxaad helaysaa IF Metall maalintii iyo habeenkiiba adigoo u sii maraya www.ifmetall.se. Halkaas waxaad tusaale ahaan ka heli kartaa heshiis wadareedkaaga,● macluumaad ku aaddan hawlaha ururka iyo hawlaha qeybta aad ka tirsantihid, warar iyo isku xire a-kassa.

Gal bogga xubnaha si aad isugu qortid koorsooyin ama aad wax uga heshid dhammaan waxyaabaha la isku cusuumayo ee ka buuxa kaarkaaga xubinnimada, IF Metallkortet.

Naga la soco Facebook, Instagram, Youtube, Twitter iyo Linkedin si aad wax walba ula socotid!

Agtaada waxaad ka heleysaa dhowr ah wakiilada la doortay – dad haysta kalsoonida inay matalaan, kuna hadlaan codkaaga adiga ka xubin ahaan. Waxay ahaan karaan tusaale ahaan wakiilkaaga ilaalinta amaanka, maamulka naadigaaga ama qaybtaada ama mas'uulka dhanka caymiska.

## Naadi

Shirkada leh shaqaale badan waxaa laga dhisaa naadi. Xubnaha ayaa doorta hogaan iyaga matala oo ilaaliya danaha xubnahan ee ku aadan shaqo bixiyaha. Go’aanka arrimaha uu naadigu ka shaqeynayo waxaa caadi ahaan lagu gaaraa kulanka xubnaha. Arrimaha caadiga ah ee uu naadigu maareynayo waxay tusaale ahaan ku saabsanaan karaan mushaar, dheereynta waqtiga shaqada, bii’ada shaqada ama diraasado. Haddii uu naadi ka jiryo goobtaada shaqada adigoo kaas soo maraya ayaad wax ka qeyb qaadan kartaa, waxna ku saameyn kartaa.

● Wax dheeraad ah ka akhriso bogga 12

## Wakiilka qaybta

Goobaha shaqo ee aan lahayn naadi waxaa badanaaba laga helaa wakiilka ururka shaqaale – wakiilka qaybtan. Goobaha shaqo ee aan lahayn cid metesha qeybta IF Metall ee aagga ku taal ayaa mas'uul ka ah ururku xiriirka uu la leeyahay xubnihiisa.

## Qeybta aaggaaga ku taal

Dhammaan xubnuhu waxaa ay ka tirsanyihiin qeybo qof walba aaggiisa ku yaalla oo IF Metall ah oo ku wada yaal waddanka oo dhan. Waxay qeybta shaqadeedu tahay in ay taageerto hawlaha ururka la xiriira ee goobaha shaqada ee gobalka. Qeybta aad adigu qof ahaan ka tirsantihid waxay ku xirantahay degmada aad deggantihid ama ka shaqeysid. Xafiiska qaybtan waxaa laga helaa wakiilka iyo shaqaale kale kuwaas oo ka shaqeeya caawimaadda wada-xaajoodyada, qasnadda shaqo la'aanta, khidmadaha xubnaha iyo waxyaabo intaas dheer.

Bogga ifmetall.se waxaa ku jira macluumaadka qeybtaada laga xiriiri karo. Waxaad sidoo kale bogga ka dhigi kartaa si macluumaadka qeybtaada toos laguu soo gaarsiin karo, tusaale ahaan wararka, waxbarashooyinka iyo nashaadaadka kale.

### Talo!

**Ka qeyb qaado oo wax saamey**

- Hubi in aad tusaale ahaan ku firfircoonaatid kulamada xubnaha.
- U soo gudbi hindise qoraal ah (mooshin) tusaale ahaan naadiga ama qeybta.
- Si dheeraad ah isu xilqaan adigoo tusaale ahaan noqonaya wakiil la doortay. La xiriir naadigaaga ama qeybta aad ka tirsantihid haddii aad taas daneyneysid.
- Fadlan ku firfircoonaw baraheenna bulshada: Facebook, Instagram iyo Twitter.

# Waxbarasho lacag la'aan ah

Aqooni waxay qofka siineysaa awood iyo fursad uu wax ku saameeyo. Sidaas darteed ayaan si weyn ugu dadaalnaa waxbarasho lacag la'aan ah oo loogu tala galay xubneheenna iyo wakiillada la doortay. Waxaad xaq u leedahay in aad shaqada fasax ka qaadatid si aad u aaddid waxbarasho ururka shaqaalaha la xiriirta, guud ahaanna xaqbaad u leedahay in lagu siiyo lacag megdhaw u ah dakhligi kaa lumay.

**Talo!**

- Eeg wixii ugu dambeeyay ee la soo bandhigay ee waxbarashooyinka isku qor adigoo gelaya bogga xubnaha ee ifmetall.se.

# Adigu waxaad ku jirtaa caymis

Xubin ka tirsan IF Metall ahaan waxaad leedahay ceymis-badbaado oo ballaaran oo fiican. Ceymisyada qaarkood waxaad ku heleysaa xubinnimada, halka kuwo kale ay ku saleysanyihiin in uu heshiis wadareed ● ka jiro goobtaada shaqada.

## Ceymisyada heshiiska

Dhammaan dadka ka shaqeeya goob shaqo oo leh heshiiska guud waxaa daboola ceymisyada heshiiska. Kuwaas ayaa bixin kara taageero dhaqaale haddii aad tusaale ahaan xanuusatid ama ku dhaawacanto shaqada. Marka aad fasax waalid ku jirtid waxaad heli kartaa kaalmo lacageed oo dheeraad ah, waxaa intaas dheer in heshiiska fadligiisa lacag hawlgab meel laguugu dhigayo.

● Wax dheeraad ah ka akhriso bogga 12

## Ceymisyada xubnaha

Xubinnimadaada waxaa ku jira ceymisyo tira badan, tusaale ahaan ceymiska shilalka ee xilliga firaaqada dhaca, ceymis nololeed oo dhammeystir ah iyo ceymis xagga dakhliga ah oo dhmmeystiraya a-kassada haddii aad baagamuuddo noqotid. Ka xubin ururka ku cusub ahaan waxaad sidoo kale fursad u heysataa in aad saxiixdid ceymisyo fara badan oo aan khasab ahayn oo faa’iidooyin badan, tusaale ahaan ceymis guri oo shuruudo fiicfiican leh, ceymis bukaan- iyo qofka ifka looga tago iyo ceymis qareen.

**Talo!**

- Bogga ifmetall.se waxaad ka akhrisan kartaa wax dheeraad ah oo ku aaddan ceymisyada ku jira xubinnimada iyo kuwa si iskaa ah loo saxiixan karo.
- Ma rabtaa in aad kordhisid ceymiskaaga badbaadada? Folksam kala xiriir taleefanka 0771-950 950.



Tillför
Slutstationen
Rör Ej

# Waxyaabaha xubnaha lagu casuumo iyo raqiisinta

Ka qof xubin ka ah IF Metall ahaan waxaad si joogto ah u heleysaa raqiisinno fara badan iyo waxyaabo la isku casuumayo oo ku aaddan badeecooyin, safarro, adeegyo iyo wax kale. Waxyaabaha aan wadajir dadka ugu casuumeyno waxaan iska kaashannaa diyaarintooda LO Mervärde, waxaana lagu heli karaa kaarkeenna xubinnimada, IF Metallkortet.

- Faa'iidooyinka waxaad si fudud uga heli kartaa bogga lomervarde.se/ifmetall.
- Si aad wax uga heshid waxyaabaha la isku casuumayo ee ku jira kaarkaaga xubinnimada waxaad u baahantahay in aad bogagga xubinnimada ka gashid bogga ifmetall.se.

**Talo!**

- Waxaa badanaa jira waxyaabo la isku casuumayo oo aag walba u gooni ah oo sidoo kale la heli karo. Fadlan wixi adiga ku khuseeya kala xiriir qeybta aaggaaga ama eeg boggooda oo aad ka geli kartid ifmetall.se.

# Waxan ayaanu u hawl-galnaa

## Urur shaqaale oo xoog leh

Mar kasta oo aynu xubno badan ku nahay ururka shaqaalaha waxaa sii kordhaysa saameynta aynu yeelan karno.
Sidaas darteed ayey muhiim tahay in aan badannahay, markaasna wadajir ayaan xoog ku lahaaneynaa.

## Heshiisyo xoogan

Heshiis wadareedku waa heshiis muhiim ah oo dhex mara ururka shaqaalaha iyo shaqo-bixiyaha. Heshiiska waxaa wada xaajood u gala ururka shaqaalaha si aad u heshid duruufo fiican, lacag ku aaddan marka aad shaqeysid waqti aan xiiso lahayn, ceymisyo, waqtiyo shaqo oo fiicfiican, mushaar caddaalad ah iyo wax kaloo badan. Mar kasta oo aan badanno, waa marka aan heshiis wadareed kan markaas taagan ka fiican si wada jir ah wadahadal ugu heli karno.

## Bulsho fiican

Hawshayada urur shaqaalaha waxaa ku jirta in loo hawl-galo bulsho ku dhisan cadaalad, dimoqraadiyad iyo sinaan taas oo adiga iyo dadka kale oo dhan aad xaq u yeelataan nolol fiican oo amaan leh. Sidaas darteed ma dalbano shuruudo mushahaaro fiican iyo shuruudo shaqo oo keliya laakiin xitaa dhanka go'aamada siyaasadeed ee wax u taraya xubnahayaga.

## Shaqo horumar leh

Hadafkeennu waa in adigaaga ka shaqeeya dhanka warshadaha aad fursad u hesho inaad ku horumarto shaqada, hesho waxbarasho iyo horumarka aqooneed ee aad u baahantahay isla markaana raad ku yeelasho weyn dhanka goobtaada shaqada. Waxaan mar walba u halgameynaa nolol shaqo oo waari karta.

## Bii’o shaqo oo tan iminka ka fiican

Wakiilka badbaadada ee ururka shaqaaluhu wuxuu mar walba ka shaqeeyaa sidii shaqa bixiyuhu uu u sii hagaajin lahaa bii’ada shaqadaada. Shaqadoodu aad bey muhiim u tahay si looga hortago in ay dhacaan shilal khatar ah. Si kastaba ha ahaatee qofkii uu ku dhaco dhaawac shaqo ama la kulma dhibaato kale isagoo jooga goobta shaqada waa inuu dareemaa taageerada ururka shaqaalaha oo helaa baxnaanis fiican si uu ugu soo noqdo shaqadan.

## Taageeridda isbeddelka

Caalamku si joogto ah ayuu isu beddelaa, xubinnimadaadana waxaad ku heleysaa ammaan xagga shaqada ah iyo haddii isbeddello ay yimaadaan. Haddii aad ka shaqeyso shirkad leh heshiiska guud oo aad weydo shaqadaada iyadoo ay sabab u tahay shaqadoo yaraatay waxaa adigu xubin ahaan aad xaq u leedahay caawimaad takhasus ah si aad u hesho shaqo cusub.

## Gaabinta waqtiga shaqada

Iyadoo ay sabab u tahay in aan shaqa bixyayaasha la saxiixannay heshiis wadareed ku aaddan hawlgab waqtiga qeybtiisa ah oo uu sidaas darteed shaqa bixiyuhu kaa shubayo lacag hawlgab oo abaalmarin ah, waxaad xaq u leedahay in aad waqtiga shaqada iska yareysid marka aad buuxisid 60 sano. Waxaa intaas dheer in aan ka shaqeyneyno in dhammaan shaqaaluhu ay sannadkiiba xaq u yeeshaan ugu yaraan 100 saacadood oo waqti shaqo oo lasoo gaabiyay ah.

# Heshiisyadayada

Heshiis ay wada gaareen ururka shaqo bixiyaha iyo IF Metall waxaa loogu yeeraa heshiis wadareed. Halkaas waxaa tusaale ahaan lagu go'aamiyaa mushaarka ugu ee la bixin karo iyo kordhinta mushaaraadka, lacagaha lagu bixinayo waqtiga dheeriga ah, lacagaha leesugu darayo marka la shaqeeyo waqti dhib leh, ceymisyada iyo mushaaraadka bukaannada iyo mushaaraadka fasaxyada haddii la shaqeeyo. Haddii aad rabtid in aad ogaatid waxa gaar ahaan adiga heshiiskaagu uu ka koobanyahay, nagu booqo bogga ifmetall.se.

# Sharciyo iyo heshiisyo wada shaqeynaya

Iswiidhan waxaa ka jira dhawr xeer oo xagga suuqa shaqada ah si loo ammaan geliyo shaqadaada. Xeerarka waxaa dhammeystiraya heshiis wadareedkeenna oo aan si wadajir ah isugula go'aamineyno xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga goobta shaqada.

Xeerarka ugu muhiimsan:
• Xeerka ilaalinta shaqada (LAS) wuxuu u soo baxyay si uusan shaqa bixiyuhu isaga eryin dadka iyadoo aysan taasi ku saleyneyn wax caqli gal ah oo aan gardarro ahayn.
• Xeerka wax isla go'aamintu (MBL) wuxuu kor u qaadayaa fursadda ay shaqaaluhu u leeyihiin in ay saameyn ku yeeshaan go'aamanka shaqa bixiyaha.
• Xeerka wakiillada la doortay (FML) wuxuu wakiillada la doortay ee ururrada shaqaalaha xaq u siinayaa in ay waqti shaqo oo ay mushaar qaadanayaan ka shaqeeyaan arrimo khuseeya xaaladaha goobtooda shaqada.
• Sharciga deegaanka shaqo, AML, hawshiisu waa in laga hortago caafimaad daro iyo shil ka dhaca shaqada.

Xeerar kale oo muhiim ah waxaa ka mid ah sharciga fasaxa, sharciga ka hortaga takooridda, sharciga fasaxa waalidnimo iyo sharciga fasaxa waxbarasho.



# Hannaankeenna dimuquraadiyadda

Guddiga ururka IF Metall waxay shaqadiisu tahay in ay hoggaamiyaan hawlaha shaqada ee ururka. Seddaxdi sanaba hal mar ayaa la qabtaa shir lagu go'aaminayo ahdaafta ururka, wakiillada shirka ayaan dooranaya guddiga ururka. Iyagana waxaa kalkooda doortay xubnaha ka tirsan qeyb walba. Kulammada ururka iyo golaha heshiisyadu waxay talo siiyaan guddiga ururka, waxaana shirarkooda loo qabta si joogto ah.

# Khidmada xubinnimada

Khidmada xubinnimada ee IF Metall waxay ku xirantahay dakhligaaga. Marka la isku celceliyo khidmadu waxay mushaarkaaga ka tahay 1,5 boqolkiiba, laakin waxaa sidoo kale jira in ugu sarreysa iyo in ugu hooseysa oo leeska qaadi karo. Bogga ifmetall.se ayaad ka akhrisan kartaa wax dheeraad ah oo ku aaddan waxyaabaha lagu qabto lacagahaaga khidmada ah.

**Ku soo dhawow IF Metall waxay ku jiheysantahay** adigaaga ah xubin cusub ee doonaya inaad wax dheeraad ah ka ogaato ururkan.

Fadlan ka qeyb qaado, wax saamey, waxna beddel adigoo ka qeyb qaadanaya kulamada ururka shaqaalaha, ku firfircoonaanaya baraheenna bulshada ama adigoo mas'uuliyad u qabanaya ururka shaqaalaha. Waxaan si lacag la'aan ah ku bixineynaa waxbarashooyin badan oo kala duduwan, kuwaas oo aad ku baran kartid wax dheeraad ah oo ku aaddan xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga. Ka xubin ahaan waxaad sidoo kale heli kartaa faa'iidooyinka kale oo fara badan. Wax dheeraad ah oo kuwaas ku aaddan ka akhriso xirmadan qoraallada ah.

Sidoo kale xasuusnaw in adiga naftirkaagu aad mar walba talo ka heli kartid wakiilladeenna la doortay ama shaqaalaha. Waxay iyagu u joogaan in ay adiga ka xubin ahaan ku caawiyaan!

**Si diirran ayaannu kuu leennahay soo dhawaw!**

Fadlan nagala soco baraheenna bulshada:

IF Metall, 105 52 Stockholm | 08-786 80 00 | ifmetall.se

IFMETALL

OF-100/202002/40 000 ex/SIB-tryck.